**In warbixin la siiyo walaalaha iyo qaraabada kale**
Baaritaanka ka dib, farriinta dadka la siinayo qodob muhiim ah oo la doonayo in lagu daro ayaa ah in warbixin la siiyo walaalaha iyo qaraabada kale. Warbixinta qoraalka ah waxaa loo isticmaali karaa in uu hawshan caawiyo. Waxaa kale oo loo isticmaali karaa caawin ahaan marka farriimaha lagu celinayo hay'adaha degmada. (Adeegga gargaarka 1-aad).



**Helitaanka**
Boorka ootismaha waxaa bilaash loogu dirayaa shaqaalaha caafimaadka ee Helse Sør-Øst kuwaas oo mas'uul ka ah baaridda iyo cudursheegga khalkhalka ootismaha.

Dadka kale ee Helse Sør-Øst ee doonaya in warbixinta qoraalka ah loo diro qiimuhu waa kr 200,- oo ay ku jirto lacagta boostada.

Boorka ootismaha iyo warbixinta qoraalka ah ee la socota waxaa bilaash loogala soo degi karaa bogga internetka ee RKT :
***oslo-universitetssykehus.no/rktaatn***


post.rkt@ous-hf.no

Oslo Universitetssykehus, Ullevål
Adeegga aqoonta gobolka ee ootismaha,
ADHA, cudurka Tourettes iyo hurdada cudurka ah
Santuuqa boostada 4956 Nydalen
0424 Oslo







©Isbataalka Jaamacadda ee Oslo / Adeegga aqoonta gobolka ee ootismaha, ADHD, cudurka Tourettes iyo hurdada cudurka ah. Dhammaan isticmaalka wixii qoraal ah ee dhaafsiisan waraaqaha la keenay waa in laga heshiiyaa.



*Hagaha qalabka wadahadalka*

# Waa maxay khalkhalka ootismaha?



**Adeegga aqoonta gobolka ee ootismaha, ADHD, cudurka Tourettes iyo hurdada cudurka ah**

HELSE SØR-ØST




*Ujeeddada warbixintan waa in si muuqaal ah iyo si qoraal ah labadaba dadka loo caawiyo oo loo dulmaro meelaha ay arrintu khuseyso marka qof lagu sheego nooc ootismaha ka mid ah.*

*Warbixinta qoraalka ah waxaa loogu tala galay in warbixin lagu siiyo dadka dhaqammada badan leh ee lagu sheegay ASF. Warbixinta qoraalka ah oo dhan waxaa lagu diyaariyay luuqadaha soo socda: Af-norwiiji, Af-ingiriis, Urdu, Af-boolan, Af-carabi, Af-soomaali.*

*Waxaan rajaynaynaa in ay tani sahasho oo tayo u yeesho gudbinta waxyaalaha la helo ama go'aanku noqdo marka qofka ootisme laga baaro, dhaqankuu doono ama afkuu doono ha ka soo jeedo qofkaasiye.*

*Warbixinta qoraalka ah waxaa diyaariyey Adeegga aqoonta gobolka ee ootismaha, ADHA, cudurka Tourettes iyo hurdada cudurka ah - Helse Sør-Øst. (RKT)*
*Kooxda mashruucu waxay ka koobnaayeen dad ka kala yimid RKT: Tage Lien, Ulla Hansen, Bodil Sjømæling*
*AHUS isbataalyaraha baxnaaninta carruurta- iyo dhallinyarada: Lise Skau Andersen*
*Adeegga baxnaaninta ee Kapellveien: Kristin Elling*
*Ururka ootismaha ee Norway: Eldrid Ytterland*
*Xafiiska nakhshadaynta ee Melkeveien: Birgitte Reff Kolbeinsen*

*Fikradda ah in boorka la sameeyo waxay markii hore ka timid Lise Andersen iyo Kristin Elling. Waa dhakhaatiir isbataal ka shaqeeya oo khibrad u leh baaridda iyo gudbinta warbixinta cudurrada ootismaha.*

*Oslo 2018*

**Boorka** iyo qoraalka la socda waxaa loo diyaariyay si ay baaritaanka ka dib u noqdaan caawin dheeri ku ah warbixinta waxyaalaha ugu adag ee lagala kulmo cudurrada ASF.

Dadka koowaad ee loogu tala galay waa shaqaalaha mas'uulka ka ah baaritaanka iyo cudursheegga carruurta qaba ASF. Cudurrada khalkhalka ootismaha (ASF) waa khalkhal korriinka ku yimaada oo dhinac walba taabanaya kaas oo qofka lagu arko in uu dadka kale ka duwan yahay xag bulsho iyo xag xiriir, isaga oo qofku yeesho qaab, habdhaqan iyo xiise soo noqnoqda oo lagu yaqaanno. Calaamaduhu waxay soo bixi karaan goor hore qofka oo yar, laakiin way ka sii dari karaan marka uu qofku sii weynaadaba.

Boorku wuxuu u qaybsan yahay qaybaha guud ee saamayn doona dhammaan dadka lagu sheego noocyada ootismaha;
- *Xiriirka bulshada iyo dhexgalka bulshada*
- *Habdhaqan, xiiso iyo firfircooni*

Boorka waxaa la diyaariyey iyada oo la tixraacayo shuruudaha cudursheegga ee ku qoran *ICD-11/DSM-5*.

Waxaa kale oo qoraalka ku jira waxa loogu yeero dhibaatooyinka kale ee caadiyan weheliya. Kuwaas oo ah dhibaatooyin aysan la kulmin dadka ASF lagu sheego oo dhan. Dhibaatooyinkani waa kuwo cudurka la socda, laakiin kama mid ah shuruudaha cudurka.

## Kaarka wadahadalka

Kaararka waxaa ku qoran qoraal iyo sawirro la mid ah kuwa boorka. Ujeeddada kaararku waa in si sahlan miis loo saari karo oo markiiba hal meel laga wadahadli karo iyada oo kaararka lagu duulayo. Dadka qaar ayay ku badan karaan haddii dhibaatooyinka kala duwan hal mar la soo hor dhigo, markaas oo kale waxaa kaararka loo isticmaali karaa in waxyaalaha mid mid loo soo bandhigo, iyo in qofka gaarka ah calaamadaha lagu arko goonidooda loo eego. Sidoo kale kaararka qoraal ahaan ayaa loo soo saari karaa si ay ka-qaybqaatayaashu ugu dul qortaan wixii faallo ah oo guriga ugu qaataan.

## Warbixinta dadka cudurka lagu sheegay

In qofka cudurka qaba laftigiisa loo sheego in uu ootisme qabo waa arrin adkaan karta.

Si kastaba waxaa muhiim ah in arrintan loo qabto si qofka gaarka ah ku habboon. Boorka ootismaha looguma tala gelin in uu beddelo oo galo booskii daaweynta wax baridda ah (psykoedukative tilnærminger), halkaas oo hadafku yahay in qofka la fahansiiyo xaaladdiisa, xooggana la saaro sidii uu hawl-maalmeedkiisa uga adkaan lahaa oo agagaarkiisa u fahmi lahaa.

Laakiin haddana waxaan qabnaa in ay dad badan wax u tarayso caawin muuqaal ah marka la dulmarayo qodobbada ugu muhiimsan ee waraaqaha ku sawiran.